



**Federal Republic of Somalia**  
*Office of the President*

SHARCI LR. 40

TAARIKH: 31/12/2020

**ANSIXINTA WAX-KA-BEDALIDDA QODOBKA 9AAD EE SHARCIGA LAGU DHISEY  
GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOYINKA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "f" ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/341/2/B-10/20  
taariikh 29/12/2020 kuna saabsan ansixinta Wax-ka-bedalidda Qodobka  
9aad ee Sharciga Lagu Dhisey Guddiga Madaxa-Bannaan ee  
Doorashooyinka Qaranka

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Wax-ka-bedalidda Qodobka 9aad ee Sharciga Lagu Dhisey Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2020**



Madaxweynaha J. F.S  
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**



Ref: GSH/BJFS/2/B-10/20 الرقم:

Mogadishu, December 29, 2020 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.**

**Ujeeddo: Soo Gudbinta Ansaxinta wax- ka-beddelid Qodobka 9aad Sharciga lagu  
dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Doorashooyinka Qanaka**

Mudane Madaxweyne,

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya ansaxiyey wax- ka-beddelka Qodobka 9aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Doorashooyinka Qanaka oo halkaan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 8-aad kulankiisii 9-aad taariikhdu markay ahayd 29/12/2020, iyadoo 145 Xildhibaan xadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 145;**

**Diiday: (0)**

**Ka aamustay: (0)**

Hadaba M.ne Madaxweyne, madam oo Aqalkii Sare Doorasho ku maqanyahay, waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

**M.ne Mahad Cabdala Cawad  
Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**

**Og: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.**

**Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobolada iyo  
Amniga ee Golaha Shacabka.**


**Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.**



ANSAXINTA WAX- KA-BEDDELID QODOBKA 9AAD  
SHARCIGA LAGU DHISAY GUDDIGA MADAXA-  
BANBAAN EE DOORASHOYINKA QANAKA

**Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku-xigeenka  
2aad-Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS**

Tirada Xubnaha Codeysay 145: Oggol: 145; ~~Dindaw: 0~~; Aamustay: 0;




Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad



Taariikh: December 29, 2020

**Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka  
Baarlamaanka JFS**



Saxiix: M. ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey



Taariikh: December 29, 2020


**Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS**



Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux



Taariikh: December 29, 2020



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA**

**GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA**

**QARAAR KU SAABSAN**

**ANSIXINTAWAX-KA-BEDDELID  
QODOBKA 9AAD SHARCIGA LAGU  
DHISAY GUDDIGA MADAXA-BANBAAN  
EE DOORASHOYINKA QARANKA IYO  
CUSBOONEYSIIN MUDA XILEEDKA  
GMDQ.**

**Muqdisho,**

**December29,2020**

## GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

- Markuu Arkey :** Qodobka 9aad Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-banbaan ee Doorashooyinka Qaranka
- Markuu Arkey:** Qodobka 111aad iyo 111G Dastuurka Federaalka iyo Qodobka 87aad Faqradda 1aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;
- Markuu Arkey:** Qodobka 63aad (b) Dastuurka Federaalka iyo Qodobka 87aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;
- Markuu Arkey:** Soojeedinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee Golaha Shacabka **Lam. GAGM & A/0055/2020** kuna taariikhsan 13/12/2020 kuna saabsan wax-ka-beddelid Sharciga LR.04 ee 02/04/2015 qodobkiisa 9aad ee nuxurkeedu ahayd cusboonnaysiin muddo xileedka Guddiga Madaxa-banbaan ee Doorashooyinka Qaranka.
- Markuu Arkey:** Howlaha mugga leh iyo horumarka balaaran uu ku talaabsaday Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka muddadii uu jiray;
- Markuu Arkey:** Baahida loo qabo in la jiritaanka Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka kaas oo wadanka gaarsiiya Doorasho qof iyo cod ah 2025.
- Markuu Dhageystey;** Doodii Xildhibaanadda Golaha Shacabka ee ku saabsanayd cusboonaysiinta muddada Xilhaynta ee Guddiga Doorashooyinka Qaranka;



BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
GUDDIGA ARRIMAHA GUDAHA, MAAMULADDA GOBOLLADA & AMINIGA

Ref: GAGM&A/0055/2020

Muqdisho, 13/12/2020

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Ku: Mudaneyaasha Golaha Shacabka ee BFS**

Ujeedo: Soojeedin Wax-Ka-Beddelid Sharciga lagu Dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee Lr. 04 ee 02/04/2015 Iyo Cusbooneysiin Muddo-Xileedka GMDQ

Mudane Guddoomiye, Mudaneyaal,

Salaan xushmad iyo qaddarin badan kaddib, waxaa sharaf u ah Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya inuu idiin soo gudbiyo wax-ka-beddelka Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka Qodobkiisa 9aad oo ku saabsan muddada xilhaynta Guddiga asoo lix sano ah oo aan la cusbooneysiin karin.


**Talo Soo-Jeedin:**

Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, kaddib:

**Markuu Arkay:** Qod. 9aad ee Sharciga Lr. 04 ee 02/04/2015 ee ku saabsan muddada xilhaynta GMDQ;

**Markuu Arkay:** Warqadda Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee GMDQ/080/2020 ee 9kii Nofeembar, 2020 oo ku saabsaneyd codsi muddo kordhin;

**Markuu Arkay:** Hawlihii wax-ku-oolka ahaa ee la xiriiray qaanuunka, nidaamka iyo habraacyada la xiriira doorashooyinka ee uu Guddigaasi soo qabtay muddadii uu dhisnaa gaar ahaan, sidii ay ugu hagar baxeen in dalkan ay ka dhacdo doorasho qof iyo cod ah;



**Markuu Tixgeliyay:** Tababarrada la siiyay, khibrada ay leeyihiin iyo waaya-aragnima dheer ee uu Guddigaasi kasbaday tan iyo intii uu dhisnaa;  
**wuxuu Garwaqsaday:** In Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka la siiyo fursad kale si ay dalka u gaarsiiyaan doorasho qof iyo cod ah sanadka 2024;

**Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo jeedinayaa:**

- 1) In Qod. 9(1)aad ee Sharciga Lr. 04 ee 02/04/2015 ee ku saabsan muddada xilhaynta GMD ee u qoran:

**Qodobka 9aad: Muddada Xilhaynta Guddiga**

- 1) **Muddada xilhaynta Guddiga Doorashooyinka Qaranka waa hal xilli oo dhan lix (6) sano oo aan la cusbooneysiin karin”**

*In Faqraddaas loobeddelosidasoosocota:*

- 1) **Muddada xilhaynta Guddiga Doorashooyinka Qaranka waa hal xilli oo dhan lix (6) sano oo la cusbooneysiin karo”;**

2) Haddaba, annagoo ah Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, kaddib markaan tixgelinnay arimaha aan kor ku soo faahfaahinnay oo dalka iyo dadkeennuba baahi weyn u qabaan, waxaan soo jeedinaynaa in Qodobkaas 9aad ee kor ku xusan wax-ka-beddelkaas kore lagu sameeyo isla markaasna **Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka** loo cusbooneysiyo muddo-xileedkooda lix (6) sano oo kale oo dheeri ah.

Wa Billaahi Tawfiiq

Xildhibaan Maxamed Cabdulle Faarax (Geeseeey)



Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye Ku-Xigeenka  
Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada & Amniga ee  
Golaha Shacabka BFS



Ref: GMDQ/080/2020 الرقم:

Mog: 09.Nov.2020 التاريخ

**Ku: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga**

**Uj: Codsii muddo xileed kordhin**

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal iyo Marwooyin

Anigoo ku hadlaya magaca Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) iga guddooma salaan iyo bogaadin.

Sidaad la wada socotaan GMDQ waxaa Dastuurka Qaranku u idmaday inuu Dalka ka qabto doorasho qof iyo cod ah, sida ku cad qodobka 111G ee Dastuurka kumeel gaarka ah.

Guddigu wuxuu aqoon gaar ah iyo waaya aragnimo dheer u leeyahay qabashada doorasho xor ah oo xalaal ah isagoo hawshaas isu soo diyaarinayeye shantii sano ee na soo dhaaftay. Sida la ogyahay, Heshiis siyaasadeed awgeed, GMDQ ma maamulayo doorashada dadban ee 2020/2021.

Sidaas darteed, maadaama GMDQ uu yahay hay'ad dawladeed, laguna bixiyey hanti badan oo ay tahay inuu abaabulo, maamulo oo hirgeliyo doorashooyinka Dalka ka dhacaya, ayaan idinka codsanayaa inaad Komishinnerada Guddiga u siyaadisaan muddo xileedka si ay fursad ugu helaan qabashada doorashada 2025 loogana faa'idaysto aqoontooda iyo waaya aragnimadooda.

Waxaan Alle ka baryayaa inuu hawshiinna idinku garab galo.

Mahadsanidiin.

Halima Ismail Ibrahim

Guddoomiyaha GMDQ







Federal Republic of Somalia  
Office of the President

SHARCI LR. 04

TAARIIKH: 02/04/2015

OGGOLAANSHAHA SHARCIGA DHISISIDDA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOYINKA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Xarafka 'C' Qodobka 90aad, Xarafka 'F' iyo Qodobka 85aad, ee Dastuurka J.F.S.

Markuu Arkay: Qodobka 49aad iyo Qodobka 111E ee Dastuurka KMG ee J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka ee ku saasan Ansaxinta Guddiga MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOYINKA QARANKA Ref. 652/3/1/9/15 ee 11/2/2015

Wuxuu soo saaray Sharcigan:

**Qodobka 1aad**


Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed Saxiixo Xeerkaan, waxa uu Madaxwaynuhu oggolaaday Ansaxinta Guddiga MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOYINKA QARANKA ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad.**

Waxa uu Sharcigan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lafti soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 02/04/2015

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD WAA LA DIIWAAN GELIYEEY DIIWAAN NO. <i>HA/1093/2015</i> TAARIIKH <i>24/06/2015</i> SAXIIXA NO. <i>1093</i>
---



Madaxweynaha J.F.S  
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud



Ref: 632/3/1/9/15/البريخ

Mogadishu, 11<sup>th</sup> February 2015 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.  
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.  
Muqdisho.

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga  
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka  
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda  
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 5aad ee fadhigiisii 37aad taariikhda markay aheyd 11<sup>ka</sup> Febraayo 2015 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 113 (Boqol Toban iyo Seddex Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 21 (Labaatan iyo Kow Xildhibaan)
- Xildhibaan ka aamustay 10 (Toban Xildhibaan).

Tell: +252 612224441/ +252 616312787


E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo qaddarin gaar ah.

  
M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM

- *Lifaaqa 1: Saxiixa Guddoonka*
- *Lifaaqa 2: Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka*
- *Lifaaqa 3: Warqadda Soo gudbinta Guddiga Arrimaha Gudaha*
- *Lifaaqa 4: Warqadda u gudbinta Xildhibaanada Golaha Shacabka*
- *Lifaaqa 5: Warqadda Soo gudbinta R/Wasaaraha*
- *Lifaaqa 6: Warqadda Soo gudbinta Wasaaradda Arrimaha Gudaha*

---

Tell: +252 612224441/ +252 616312787


E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)

ANSIXINTA SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA  
MADAXABANNAAN EE DOORASHOYINKA QARANKA

**Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS**

Tirada Xubnaha Codeysay 144: Oggol (113) Diidmo (21) ka aamustay (10)

  
Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 11<sup>th</sup> February 2015

**Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS**


Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 11<sup>th</sup> February 2015

**Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS**

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 11<sup>th</sup> February 2015





JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA MADAXABANNAAN  
EE DOORASHOYINKA QARANKA**

**SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA MADAXABANNAAN EE  
DOORASHOYINKA QARANKA**

**Cutubka 1aad: Qodobbo Guud**

**Qodobka 1aad: Fasiraadda Ereyada**

Ereyada hoos ku qoran, waxaa sharcigan dhexdiisa loola jeedaa mid walba fasiraadda ku hor qoran:-

1. **Dastuurka:** Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed oo sida ku meel gaarka ah loo ansixiyay.
2. **Sharciga:** Sharciga lagu dhisayo Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka
3. **Dawladd:** Waxaa loola jeedaa Dawladda Dhexe ee Federalka ah;
4. **Dowlad Goboleed:** Waa Dowladaha Xubinta ka ah Dowladda Dhexe ee Federalka ah
5. **Dowladaha Hoose:** Waa Maamullada heer degmo;
6. **Doorashooyinka:** Doorashooyinka heer qaran
7. **Guddiga:** Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka
8. **Guddoomiye:** Guddoomiyaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka;
9. **Jamhuuriyadda:** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
10. **Madaxweynaha :** Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
11. **Xubnaha:** Xubnaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka;
12. **Xoghayaha Guud:** Xoghayaha Guud ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka;
13. **Isxildiid:** Xilalka aan is-raaci karin ama aan is qaadan karin ee mas'uulka uusan mar qura ah wada qaban karin;

**Qodobka 2aad: Ujeeddada Sharciga**

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee u xilsaaran maamulidda iyo maaraynta doorashooyinka qaranka si waafaqsan Qodobada 47, 110, 111G iyo 112 ee Dastuurka sida ku-meel-gaarka ah loo ansixiyey.
2. Waxaa kaloo sharcigan lagu dhisay awoodahiisa iyo xilalkiisana lagu qeexay Guddiga kormeerka doorashooyinka iyo aftida ee heer degmo, gobal iyo Qaran;
3. Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaran marka uu gudanayo xilkiisa waa ka madaxbannaan yahay laanta fulinta iyo Xisbiyada Siyaasadeed oo dhan, wuxuuna u hoggaansamayaa oo keliya Dastuurka Federaalka iyo sharcigan.

### **Qodobka 3aad: Shakhsiyadda Qanuuniga ah ee Guddiga**

1. Guddigu wuxuu leeyahay shakhsiyad qaanuuneed oo ku saxiixi karo heshiisyo leh awood qaanuuneed oo u fududeeynayo hawlaha lagama maarmaanka u ah habsami u socodka hawlaha doorashooyinka iyo xil gudashada Guddiga si waafaqsan sharcigan;
2. Guddiga wuxuu sameysanayaa astaan iyo shaabad u gaar ah.

### **Qodobka 4aad: Mabaadi'da Guud**

1. Guddigani inta uu ku gudo jiro fulinta xilkiisa waxaa uu u hogaansamayaa mabaadi' guud ay ka mid yihiin:-
  - a) Ilaalinta Midnimada iyo wadajirka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
  - b) Mabaadi'da nidaamka Dimoqraadiyadda iyo Federalka;
  - c) Ilaalinta Xuquuqda siyaasadeed ay dawga u leeyihiin dhamaan muwaadiniinta Soomaaliyeed si ay codkooda ugu dhiibtaan si waafaqsan Qod.22 (1) iyo (2) ee Dastuurka;
2. Guddiga wuxuu kaloo si gaar ah u ilaalinayaa in doorashooyinku ahaadaan kuwo xor ah oo caddaalad ku dhisan, kuna saleysan:-
  - a) Codbixin qarsoodi ah, xor ah, ka dhawrsan wax isdaba marin, musuqmaasuq, laaluush, been abuur, handadaad, cunfi iyo cabsi gelin saameyn ku yeelan karta codbixinta;
  - b) In Guddiga xilkiisa u guto si madaxbanaan oo waafaqsan shuruucda xeerisa doorashooyinka;
  - c) In hawlaha doorashooyinka loo maamulo si eex la'aan ah oo dhexdhexaad ah, laguna fuliyo hab tayeysan, taxadir leh, dhaqan ansheheedka suuban, caddaalad iyo hufnaan.

### **Qodobka 5aad: Xarunta Guddiga**

Xarunta Dhexe ee Guddigu waa Caasimadda Dalka ee Muqdisho, wuxuuna laamo ku yeelan karaa dalka oo dhan.

### **Cutubka 2aad: Dhismaha Guddiga**

#### **Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Guddiga**

1. Guddiga doorashooyinka wuxuu ka koban yahay sagaal (9) xubnood si waafaqsan Qod. 111G ee Dastuurka sida ku-meelgaarka loo ansixiyay kaasoo ugu yaraan labo (2) xubnood ay yihiin haween.
2. Guddigu wuxuu yeelanayaa Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen oo xubnaha iska dhex dooranayaan, kulankiisa ugu horeeya waxaa shir guddoominaya xubinta ugu da'da wayn.

3. Guddiga Doorashooyinka wuxuu dhisan karaa guddi-hoosaadyo ka kooban xubnihiisa hadba sida uu u arko inay lagama maarmaan u tahay gudashada hawlihiisa.

### **Qodobka 7aad: Habraaca Magacaabista Guddiga**

1. Wasiirka Wasaaradda ay khusayso arrimaha doorashooyinka ayaa bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda ka soo magacaabaya Guddi lataliyaal oo ku-meel gaar ah oo ka kooban todobo (7) xubnood oo leh sumcad iyo aqoon sare. Guddiga ku-meel gaarka ah wuxuu kala talinayaa Wasiirka habraaca iyo xulista musharixiinta jagada Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka.
2. Dhamaan xubnaha Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka waa inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan Qod. 8aad ee Sharcigan;
3. Kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood, ka bilaabata marka sharcigan la soo saaro Wasiirka ay khuseyso wuxuu u bandhigayaa dadweynaha danaynaya inay ka mid noqdaan Guddiga inay araajidooda u gudbiyaan Wasaaradda;
4. Kow iyo labaatan (21) maalmood gudeheed ka bilaabato marka uu Wasiirka ay khuseeyso uu soo dhameystiro kala hufidda codsadayaasha , wuxuu Golaha Wasiirada u gudbinayaa todobo iyo labaatan (27) musharrax oo laga soo xulay codsadayaasha, Golaha Wasiirada waxay go'aaminayaan sagaalka musharax una soo gudbinayaan Golaha shacabka si uu ansixyo.
5. Kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood marka Golaha Wasiirada u soo gudbiyo Golaha Shacabka, Goluhu wuxuu sagaalka (9) musharrax ee ku xusan Faqradda (4) ee Qodobkan ugu yeerayaa in ay fadhiga Golaha hortiiisa ka jeediyaan musharraxnimadooda, aqoontooda, waayo aragnimadooda iyo aragtidooda fog ee ay tiigsanayaan jagada xubinnimada Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka Qaranka;
6. Marka uu dhamaado dhegeysiga musharixiinta ee ku xusan Faqradda (5) ee Qodobkan, Golaha Shacabka wuxuu xubin kasta oo la soo magacaabay ku ogolaanayaa ama ku diidayaa cod aqlabiyad fudud oo hal dheeri ah;
7. Hadii hal musharrax ama ka badan la diido sida ku xusaan Faqradda (6) ee Qodobkan, Golaha Wasiirada waa inay soo bedelaan xubinta la diiday si waafaqsan Faqradda (1) ilaa (6) ee Qodobkan;
8. Magacaabista ku xusan Faqradda (7) ee Qodobkan , habraaca ku xusan Faqradda (4) iyo (5) ee Qodobkan, waxaa kow iyo labaatan (21) maalmood gudahood lagu soo celinayaa Golaha Shacabka si loo dhameystiro xubnaha Guddiga;
9. Mar hadii sagaalka (9) musharax uu wada ansixiyo Golaha shacabka sida ku xusan Faqradda (3) ilaa (8) ee Qodobkan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu magacaabista xubnaha ku meel marinayaa xeer Madaxweyne kow iyo labaatan (21) maalmood Gudahood laga bilaabo taariikhda Guddoonka Baarlamaanka u gudbiyo.



### **Qodobka 8aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga**

1. Qof walba wuxuu xaq u yeelan karaa inuu noqdo xubin Guddiga ka tirsan haddii qofka:
  - a) yahay muwaaddin Jamhuuriyadda Soomaaliyeed;
  - b) Da'diisu aysan ka yarayn 30 jir;
  - c) Dhimirkiiisu dhan yahay;
  - d) Uu aqoon u leeyahay nidaamka doorashooyinka ama ugu yaraan shan (5) sano waayo aragnimo ugu yaraan mid ka mid ah qeebaha cilmiga: Shareecada iyo fiqiga Islaamka, qaanuunka, xeer dhaqameedka Soomaalida, Culuumta Diinta, arrimaha maamulka dadweynaha ama arrimaha bulshada rayidka, kasmooyinka culuumta siyaasada iyo maareynta arrimaha bulshada, maamulka dawlada iyo xiriirka caalamiga ah;
  - e) Waa inuu yahay qof sumcad wanaag ku leh Bulshada dhexdeeda, urursan oo dhaqan-wadaag iyo dhalan-wanaag leh oo aan ku soconin baaris danbiyo ciqaab oo lagu mutaysanaayo qaanuunka dalka, kan caalamiga ah iyo dembi xeer jabin ku ah Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee 1949 kii ama arrimo dembi culus ku ah shuruucda Soomaaliyeed iyo in uusan ahayn mid ku xad gudbay go'aanada Golaha Ammaanka ee Qaramada midoobay
  - f) Waa in uusan ahayn xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka, Baarlammannada Dawladaha Xubinta ka ah Federaalka, Xukuumadda ama shaqaalaha dawladda Soomaaliyeed
  - g) In uusan ka tirsanayn mid ka mid ah Xisbiyada Siyaasadeed kuna biiri Karin muddada uu howshan hayo.

### **Qodobka 9aad: Muddada Xil-haynta Guddiga**

1. Muddada xil haynta Guddiga Doorashooyinka Qaranka waa hal xili oo dhan lix (6) sano oo aan la cusbooneysiin karin.
2. Xubnaha Guddiga shaqadoodu waa mid jogta ah.

### **Qodobka 10aad: Waayidda Xubanimada Guddiga**

1. Jagada xubinta Guddiga waxay jago banaan noqoneysaa haddii ay :
  - a) Xubinta xilka istaqaalo ka dhiibto;
  - b) Xubinta jabiso xeerka dhaqan shaqo wanaaga;
  - c) Xubinta sabab la'aan uga maqnaato shan (5) fadhi oo xiriir ah uu Guddiga yeeshay;
  - d) Xubinta xilkeeda xafiiseed ay la gudan weyso karti darro jireed ama maskaxeed awgeed;
  - e) Geeri;
  - f) Haddii ay Maxkamadi ku xukunto xukun ciqaabeed kama dambeys ah
  - g) Muddada xil haynta oo dhamaata

2. Guddigu wuxuu xil ka qaadis ku sameyn karaa xubin kamid ah xubnaha guddiga si waafaqsan Faqradda 1(b), (c) iyo (d) marka ay isku raacaan aqlabiyadda cod seddex meelood labo meel (2/3) ee Guddiga, waxaa go'aan kama dambays ah ka gaaraya Maxkamada khuseeysa;
3. Marka ay banaanaato xilka xubin kamid ah xubnaha guddiga waxaa lagu buuxinayaa si waafaqsan qodobka 8aad ee sharcigan.

#### **Qodobka 11aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga**

Guddoomiyaha guddiga waa madaxa Guddiga Doorashooyinka wuxuuna mas'uul ka yahay arrimaha soo socda:

- a) Isugu yeeridda iyo guddoominta kulamada Guddiga;
- b) Hagida iyo u kuurgelidda qorshe hawleedka Guddiga;
- c) Xoojinta iyo joogteynta xiriirka shaqo ee kala dhexeeya Guddiga doorashooyinka iyo heerarka kala duwan ee Dawladda;iyo
- d) Fulinta wixii waajib kale ee sharciga u xil saaro.

#### **Qodobka 12aad: Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga**

Guddomiye ku-xigeenka Guddiga Doorashooyinka wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda:

- a) Hawl kasta oo u xilsaaro Guddoomiyaha Guddiga;
- b) Inuu qabto hawsha iyo waajibaadka Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama ku timaado xaalad xil gudasho la'aan joogto ah;
- c) Hawl kasta oo kale oo uu u xil saaro Dastuurka ama Shuruucda kale ee dalka.

#### **Qodobka 13aad: Xilka Xoghayaha Guud ee Guddiga**

1. Xoghayaha Guddiga wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda:
  - a) Waa madaxa maamulka Guddiga mas'uulna ka ah hagidda hawlaha xogheynta;
  - b) Xoghayaha waa Madaxa Maamulka Xafiiska Doorashooyinka, kaasoo siinaya Guddiga Doorashooyinka talooyinka ugu haboon habka maamulka doorashooyinka;
  - c) Xoghayaha wuxuu ku shaqeynayaa awaamirta Guddiga isla markaana wuxuu siinayaa warbixin joogta ah;
  - d) Fulinta go'aannada Guddiga;
  - e) Kormerida iyo hagidda habsami u socodka shaqada iyo shaqaalaha Guddiga;
  - f) Wuxuu mas'uul ka yahay keydinta dukumintiga Guddiga; iyo
  - g) Hawl kasta ee kale oo u xilsaaray Guddiga ama sharcigan.

2. Xogahayaha Guddiga kama mid aha xubnaha Guddiga Madaxabanaan ee Doorashooyinka, waxaa lagu xulayaa habraac ku xusan sharciga shaqaalaha rayidka ee dalka;
3. Xogahayaha guud wuxuu ka qaayb galayaa shirarka Guddiga wuxuuna ka dhiiban karaa taladiisa hase ahaatee ma codeeyn karo.

### **Qodobka 14aad: Xilalka iyo Awoodaha Guddiga**

1. Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka si waafaqsan Qodobka 111G ee Dastuurka, wuxuu leeyahay xiliilka iyo awoodaha soo socda:
  - a) Abaabulidda, qabashada iyo kormeerka doorashooyinka heer degmo, gobol, qaran ee axsaabta siyaasadeed iyo aftida dadweyne;
  - b) Taniyo inta axsaabta siyaasadeed iyo deegaan doorashooyin dalka ka hirgalayaan, Guddigu wuxuu doorashooyinka deegmooyinka iyo maamul goboleedyada ku maamulayaa si waafaqsan sharciga LR 116 iyo wixii kale oo shuruucda dalka u xilsaaro;
  - c) Diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha iyo joogtaynta dib-u-eegidda diiwaanka codbixiyeyaasha;
  - d) Xadidaadda deegaanada iyo goobaha codbixineed hadba sida ugu habboon oo doorashooyinka looga fulin karo;
  - e) Nidaaminta iyo hubinta shuruucda axsaabta siyaasadeed, si waafaqsan sharciga diwaangelinta axsaabta iyo shuruucda kale ee dalka;
  - f) Fududaynta kor joogtaynta, ilaalinta iyo qiimaynta doorashooyinka;
  - g) Soo saarida iyo hirgelinta xeer dhaqameed hagaya musharaxiinta iyo axsaabta doorashada ka qeyb galeysa;
2. U kuurgelidda iyo ilaalinta in axsaabta ku dhaqmaan sharciyada nidaaminaya magacaabista musharaxiinta axsaabta.
3. Hirgelinta Wacyi-gelinta cod-bixiyeyaasha;
4. Diiwaangelinta Musharaxiinta doorashooyinka;
5. Maamulidda doorashada Baarlamaanka Federaalka.
6. Maamulidda qabashada Afti dadweyne.
7. Kormeeridda iyo fududaynta hawlaha doorashooyinka.
8. Xallinta khilaafaadka doorashooyinka iyadoo aan lagu xadgudbeyn doorka hay'adda Garsoorka Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya
9. Ku dhawaaqidda natiijooyinka doorashooyinka
10. Ku dhawaaqidda muddeynta maalmaha ololaha doorashooyinka, xaddidaada muddada kama danbeysta ah ee doorashooyinka iyo waqtiyeynta abaabullidda iyo diyaarinta doorashooyinka si waafaqsan Dastuurkan iyo Sharcigan.
11. Soo saaridda xeer, habraacyo iyo qoraallo hagaya habsami u socodka doorashooyinka;
12. In uu xafiisyo ka furto degaannada dalka hadba meelaha ugu habboon oo aan looga maarmin fulinta hawlaha Guddiga iyo xilgudashadiisa.

13. In Guddigu uu qorto shaqaale lagama maarmaan u ah fulinta hawlaha doorashooyinka lana waafajiyo sharciga Shaqaalaha rayidka.
14. Guddiga wuxuu shaqo joojin ku sameyn karaa una guddin karaa hay'adaha cadaaladda qof kasta oo ka tirsan Guddiga ama shaqaalaha Guddiga oo lagu helo fal wax u dhimaya dhexdhexaadnimada iyo cadaaladda doorashooyinka;
15. Khilaafaadka uu xaliyo Guddigu waa kama dambays aan ka ahayn dacwadaha la xiriiira xaqa cod bixinta, xaqa ka qaybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee doorashada kaasoo loo qaadan karo racfaan Maxkamadda Dastuurka.
16. Dejinta nidaamka dhaqan-wanaagga musharrixiinta, axsaabta siyaasadeed iyo warbaahinta;
17. Inuu go'aan maamuleedka Guddiga ka gaaro cabashooyinka la xiriiira go'aannada Guddiga, hawlwadeennada ama wakiillada Guddigu idmaday kana qaado tallabada ku haboon. Haddii go'aanka guddiga lagu qanci waayo waxaa u furan in racfaan loo qaato Maxkamadda ay khuseyso muddo 14 maalmood gudahood ah, maxkamaddu waa in ay go,aan kama dambays ah ku gaarto sida ugu dhaqsaha badan;
18. In uu hubiyo tallaabada ku habboona ka qaado in habraaca doorashooyinka uu Guddigu fuliyey si hufan loo hirgeliyey, haddii loo baahdana uu go,aan ku gaari karo in deegaan doorasho ka dhacday dib loogu celiyo doorasho cusub iyo inuu wax-kama-jiraan ka dhigo natiijada marka ay u sugnaato in rabitaanka cod-bixiyeyaasha la musuqmaasuqay;
19. In uu ganaaxi karo ama xannibaad-maamuleed ku ridi karo ciddii ku kacda faldanbiyeed, oo aan ahayn fal jariimo, ku xadgudub sharci ama xeer-nidaamiyaha Guddiga.
20. In musharrixii ku xadgudba sharcigan ama kuwa aan soo buuxin shuruudaha sharcigan ku xusan uu ka joojin karo tartanka doorashada ama dib-u-celin karo liiska/liisaska lagu soo magacaabay.
21. In uu cayimo goobaha cod-bixinta ay dadweynuhu codkooda ku dhiibanayaan.
22. In uu tilmaamo waraaqaha doorashooyinka iyo habka loo calaamadinayo.
23. In uu qeexo habka loo tirinayo codadka.
24. In uu cayimo goobaha lagu tirinayo codadka.
25. In uu go'aamiyo goobjoogayaal Madaxbannaan iyo Saxaafadda oo u kuur galaya sida doorashada u socoto.
26. Guddiga doorashadu wuxuu soo jeedin karaa dib u dhigis doorasho ee muddo cayiman isagoo sababeyn faahfaahsan u soo guddinaya Golaha Baarlamaanka Federalka xilli ku habboon.
27. Fulinta hawl kasta oo Dastuurka iyo sharcigani u xilsaaray.

## **Cutubka 3aad: Xeer-hoosaadka Guddiga**

### **Qodobka 15aad: Xeer-hoosaadka Guddiga**

1. Guddigu Madaxabannaan ee Doorashooyinka wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad lagu maamulo hawlaha iyo dhaqan gelinta Qodobada uu sharcigan tilmaamay;
2. Iyadoo waxba loo dhimayn, Faqradda (1) ee Qodobka, xeer-hoosaadka waxaa ka mid ah:
  - a) Magacaabista, ansixinta iyo awood-siinta xubnaha xafiisyada hoos yimaada mas'uuliyada Guddiga madaxabannaan ee doorashooyinka si waafaqsan sharcigan;
  - b) Ka qaadista tallaabo anshax marin sarkaal kasta ama wakiil kasta ee ka tirsan xafiis hoos imaanaya mas'uuliyada Guddiga Madaxabannaan si waafaqsan sharcigan;
  - c) Baabi'in jago horay loo magacaabay ama shaqo ka fariisin shaqaaale xafiis kasta oo hoos yimaada mas'uuliyada Guddiga si waafaqsan Sharciga;
  - d) Dejinta habraaca goobaha doorashooyinka;
  - e) Xiriirinta, u wakiilashada hawlaha, mas'uuliyada Guddiga iyo xogheyntooda; iyo
  - f) Fulinta hawl kasta oo Dastuurka iyo sharcigani u xilsaaray.

### **Qodobka 16aad: Kulamada iyo Habraaca Go'aannada Guddiga**

1. Kulamada Guddiga waxay ku ansaxayaan markay guntanka dhanyahay 5 xubnood oo Guddiga ka mid ah.
2. Dhamaan kulamada Guddiga waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha Guddiga, marka uu maqan yahay waxaa shir guddoominaya ku-xigeenka;
3. Hadii Guddoomiyaha iyo ku-xigeenka maqan yihiin, xubnaha jooga waxay cod aqlabiyad ah ku dooraanayaan shir guddoomiye ku-meel gaar ah si uu u shir guddoomiyo;
4. Go'aannada Guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal-dheeri ah ee tirada guud ee xubnaha guddiga (50%+1);
5. Marka ay Codeynta ku xusan Faqradda (4) ay noqoto isbar bardhac, Guddoomiyaha ayaa codeeynaya
6. Guddigu wuxuu u bandhigayaa dadweynaha magacyada musharixiinta doorashada, warqada doorashada, natiijada kama dambeysta ah ee doorashada iyo arrimo kasta oo muhiim u ah in dadweynaha lagu wargeliyo;
7. Inta suurtagalka ah, Go'aan kasta ee Guddiga wuxuu ku gaarayaa si wadar-ogol ah.

### **Qodobka 17aad: Xasaanadda Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga doorashooyinka ama hawl wadeenadooda laguma soo oogi karo dacwad madani ah ama mid ciqaabeed inta ay gudanayaan hawshooda;
2. Dhismooyinka iyo xafiisyada Guddiga doorashooyinka lama baari karo iyadoo aan ogolaansho laga haysanin Maxkamadda Sare ee Federaalka.

### **Cutubka 4aad: Qodobo Qubane ah Qodobka 18aad: Miisaaniyadda Guddiga**

1. Guddigu wuxuu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ahaanaysa miisaaniyadda guud ee Qaranka si waafaqsan Qodobka. 110 (4) ee Dastuurka;
2. Guddiga wuxuu u madaxbannan yahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan shuruucda maaliyadda ee maamulka dowladda;

### **Qodobka 19aad: Mushaarka, Gunnooyinka iyo Xuquuqda xubnaha Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga waxay xaq u leeyihiin gunno bileed si waafaqsan habraacyada ay xukuumadda Federaalka ku dhaqanto;
2. Xubnaha Guddiga waxay xaq u leeyihiin gunno safar iyo kharajyo kale ay ku bixinayaan markay safar shaqo la xiriira gudashada hawlhooda u aadayaan;
3. Xubnaha Guddiga iyo dhamman hawladeennada waxay xaq u leeyihiin bil fasax ah sanadkiiba.

### **Qodobka 20aad: Is-xildiidka Xubinnimada Guddiga**

1. Xubnaha Guddiga ma qaban karaan xil kale inta ay hayaan xilka xubinmada Guddigan;
2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddigan waa in ay xilka iska casishaa lix (6) bilood ka hor inta uusan xil siyaasaded isku sharxin,
3. Xubin kasta oo kamid ah Guddigaan marka loo dhaariyo xubinimada guddigaan wuxuu waayayaa xil kasta uu horey u hayey;

### **Qodobka 21aad: Dhaarta Guddiga Doorashooyinka**

Inta aysan qaban xilka xafiiska, dhamaan xubnaha Guddiga waxaa Golaha Shacabka hortiisa ku dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare dhaarta hoos ku qoran:

*“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Illaahay inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diintu, dhawrana Dastuurka Qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaala”*

#### **Qodobka 22aad: Xeerka Dhaqan-wanaagga shaqo**

Guddiga iyo dhamaan howlwadeenadiisa, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan Xeerka Dhaqan Wanaagga Shaqo ee lagu tilmaamay **lifaafa 1aad** si loo hubiyo in ay hawlhooda u gutaan si madax-bannaan oo daacadnimo, hufnaan iyo digtoonni ku jirto isla markaana ka fog eex.

#### **Qodobka 23aad: Warbixinta Guddiga**

1. Guddigu wuxuu u soo gudbinayaa Golaha shacabka warbixin Afartii biloodba mar.
2. Guddigu wuxuu soo saarayaa natiijooyinka Doorashooyinka ee heer Qaran;
3. Guddigu wuxuu kaloo soo saarayaa qoraallo iyo wacyi gelin dadweyne.

#### **Qodobka 24aad: Maareynta Xogta iyo Macluumaadka**

1. Guddigu wuxuu daabacayaa islamarkaana faafinayaa dhamaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan awaamirta iyo talooyinka uu siinaayo Shacbiga;
2. Bixinta macluumaadkaas waxaa la waafajinaayaa baahida xafidaadda ama ilaalinta sirta Guddiga;
3. Xubin kasta ee Guddiga iyo howlwadeenadiisa waxay saxiixayaan heshiis la xiriira xagga sirta iyo xafidaadda macluumaadka doorashooyinka;
4. Guddigu markuu arko inay habboon tahay, wuxuu baahinayaa, ama ogeysinayaa dadweynaha macluumaadka lagama maarmaanka ah si qeexan:-
  - a) Halka ay xafiisyada Guddigu ku yaallaan;
  - b) Cinwaanadda xafiisyada, lambarrada taleefoonnada iyo habkii kale ee lagula xiriir karo.

#### **Qodobka 25aad: Tala sharciyeed**

Guddigu wuxuu waydiin karaa tala sharciyeed Garyaqaanka Guud ee Dawladda iyo Maxkamadaha kale ee dalka.

#### **Qodobka 26aad: Burin Sharci**

Sharcigan wuxuu burinayaa sharci kasta ee dalka ka jira oo ka horimaanaya sharcigan.

#### **Qodobka 27aad: Dhaqangalka Sharcigan**

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa marka uu Baarlamaanka Federalka ansixiyo, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

## Lifaaqa 1aad:

### Nidaamka Dhaqan-wanaagga Xubnaha Guddiga iyo Hawlwadeenada

#### 1. Madaxbanaanida iyo dhaxdhexaadnimada xubnaha

- a) Xubin kastoo ka mid ah Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo shaqaalaha Guddiga waa inay u gutaan hawshooda ah, cadaalad ah iyo dhaxdhexaadnimo ku salaysan daacadnimo kana maran cabsi gelin kasta ama nacayb iyo eex saameyn ku yeelan karta:
  - i. Hay'ad kasta oo ka tirsan dawladda;
  - ii. Xisbi siyaasadeed;
  - iii. Musharax doorasho;
  - iv. Awood kasta oo kale ama ururo

#### 2. Ka madaxbannaanida xafiis siyaasadeed ama dawladeed

- a) Xubin kasta ee Guddiga iyo shaqaalaha xaq uma laha muddo xiliyeedkooda in:
  - i. Loo magaacabo xafiisyo siyaasadeed;
  - ii. In loo magacaabo xafiis dawladeed kale.
- b) Xubinta Guddiga doorashooyinka waa:
  - i. In aysan si toos ah ama si dadban u taageerin ama uga hor imaanin xisbi si kastaba ama musharax oo ka qaybgalaya doorasho ama arimo la xiriira xisbi siyaasadeed, musharixiin ama mucaarad;
  - ii. In uusan isticmaalin ama ka faaideysan xogta sirta uu awood u leeyahay helitaankeeda maadaama uu ka tirsan yahay Guddiga;
  - iii. In uusan siinin xog ama macluumaad dhinaca seddexaad ama shakhsi aanan ka ahayn xogta ama macluumaadka la xirria howlgudashadooda.
1. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga oo si toos ah ama si dadban uga dan leh qandaraas guddigu bixinayo, ama ah qandaraas soo jeedin ku jira ama arrin kastoo kale oo ajenda Guddiga horyaal ah oo dan qof ahaan xiriir toos ama dadban ku sameyneysa, kama qaybgalayo fadhiga looga hadlaayo qandaraaskaas ama arrinta kale ee Guddiga hortaal kamana codeynayo, loomana tirinayo guntanka fadhiga arrinta uu Guddigu ka go'aan gaarayo;
2. In uusan ku dhaqmin wax yeelo wax u dhimi karta madaxbannaanida Guddiga, ku dhawaaqo ama ka mid noqdo hadal jeedin si toos ama dadban halis u gelin karta hufnaanta iyo dhaxdhaadnimada Guddiga;

#### 3. Xirfad wanaag

Xubin kastoo ka tirsan Guddiga iyo hawladeenada Guddiga waa:

- a) Inay u gutaan xilkooda sida ugu wanaagsan ee u hanan karaan kalsoonida dadweynaha ay ku qabaan Guddiga;



- b) Inay ula dhaqmaan dadweynaha iyo talo wadaaga si sharaf iyo ixtiraam ku dheehan tahay;
- c) Inay u gutaan xilkooda si xirfad wanaag ay ku dheehan tahay iyadoo la raacayo xeer-hoosaadka iyo sharciga; iyo
- d) Inay ixtiraamaan xuquuqda xoriyaadka dhamaan muwaadiniinta.

**4. Ku-tanaadid sharci darro**

Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga iyo hawl-wadeenada Guddiga waa:

- a) In uusan si sharci daro ah u isticmaalin xilka si uu ugu tanaado ama ugu tanaadiyo cid kale;
- b) In uusan qaadan ama weydiisan hadiyad cid kasta oo dan hawleed ka leh xafiiska Guddiga;
- c) In uusan siinin xog ama macluumaad uu hayo si uu uga faa'ideysto ama uga faa'ideeyo cid kale.

## **Tusmo**

<b>Cutubka 1aad: Qodobbo Guud</b> .....	2
Qodobka 1aad: Fasiraadda Ereyada .....	2
Qodobka 2aad: Ujeeddada Sharciga.....	2
Qodobka 3aad: Shakhsiyadda Qanuuniga ah ee Guddiga.....	3
Qodobka 4aad: Mabaadi'da Guud .....	3
Qodobka 5aad: Xarunta Guddiga .....	3
<b>Cutubka 2aad: Dhismaha Guddiga</b> .....	3
Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Guddiga.....	3
Qodobka 7aad: Habraaca Magacaabista Guddiga .....	4
Qodobka 8aad: Shuruudaha Xubinnimada Guddiga.....	5
Qodobka 9aad: Muddada Xil-haynta Guddiga .....	5
Qodobka 10aad: Waayidda Xubanimada Guddiga .....	5
Qodobka 11aad: Xilka Guddoomiyaha Guddiga .....	6
Qodobka 12aad: Xilka Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga .....	6
Qodobka 13aad: Xilka Xoghayaha Guud ee Guddiga .....	6
Qodobka 14aad: Xilalka iyo Awoodaha Guddiga.....	7
<b>Cutubka 3aad: Xeer-hoosaadka Guddiga</b> .....	9
Qodobka 15aad: Xeer-hoosaadka Guddiga .....	9
Qodobka 16aad: Kulamada iyo Habraaca Go'aannada Guddiga.....	9
Qodobka 17aad: Xasaanadda Guddiga.....	10
<b>Cutubka 4aad: Qodobo Qubane ah</b> .....	10
Qodobka 18aad: Miisaaniyadda Guddiga .....	10
Qodobka 19aad: Mushaarka, Gunnooyinka iyo Xuquuqda xubnaha Guddiga.....	10
Qodobka 20aad: Is-xildiidka Xubinnimada Guddiga .....	10
Qodobka 21aad: Dhaarta Guddiga Doorashooyinka .....	10

Qodobka 22aad: Xeerka Dhaqan-wanaagga shaqo ..... 11

Qodobka 23aad: Warbixinta Guddiga ..... 11

Qodobka 24aad: Maareynta Xogta iyo Macluumaadka ..... 11

Qodobka 25aad: Tala sharciyeed ..... 11

Qodobka 26aad: Burin Sharci ..... 11

Qodobka 27aad: Dhaqangalka Sharcigan ..... 11

**Lifaafa 1aad: ..... 12**

REPUBLIC FEDERAL OF SOMALIA  
Federal Parliament  
Committee of Interior Affairs, Regional  
Administration & National Security



جمهورية الصومال الفيدرالية  
البرلمان الفيدرالي  
جنة الشؤون الداخلية، إدارة الاقاليم  
و الأمن القومي

Mahdi  
Ira la  
badiyo  
3/2/15

Ref: GAGMCA/096/2015

02/02/2015

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka  
=Muqdisho=

Koof Guud  
Sulex.

fodlan  
hala  
badiyo

3/2/15

Ujeedo: warbixin la xiriirta dib u eegis Hindise Sharciyeedka Guddiga madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka.


Mudane Guddoomiye,

Mudanayaal,

Guddiga Arrimaha, Maamulada Gobollada iyo Amniga waxaa sharaf u ah in ay idiin soo gudninayaan warbixintan ku sabsan mowduuca ujeedada kor ku xusan, iyaddoo la tixraacayo Qodobka 68 (3) ee Dastuurka iyo Qodobada 61 iyo 62 ee Xeer hoosaadka Golaha Baarlamaank, Guddiga wuxuu dib u eegis ku sameeyay Hindise Sharciyeedka ay soo gudbisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka.

Hindise Sharciyeedkaan waxaa lagu dhisayaa Guddiga madaxbannaan ee Doorashooyinka si waafaqsan Qod 111 G ee Dastuurka I.F.S. guddiga madaxbannaan ee Doorashooyinka wuxuu mustaqbalka ku leeyahay awood iyo saameyn balaaran arrimaha siyaasadeed ee Soomaaliya, isagoo maamulayo hirgelinayaa doorashooyinka Qaranka oo xor ah kuna dhisan cadaalad ay ku tartamayaan musharaxiin ka socota asxaab siyaasadeed sanadka 2016. Iyadoo mudada doorashooyinka ay nagu soo foolleeyihiin, howlaha doorashooyinkana ay aad u balaaran yihiin, ayaa waxaa lagama maarmaan ah in si deg deg ah loo diyaariyo loona ansixiyo Sharciiga lagu maamulayo Guddiga Doorashooyinka Qarank.

Halkaan waxaa ku soo lifaaqan qodobadii wax ka bedelka ku sameeyeen Xildhibaanada Golaha Shacabka, qodobaas oo kala ah:



1. Qodobka 6aad, qaab dhismeedka Guddiga faq 1aad
2. Qodobka 7aad, habraaca magaacabista: faqradiisa 1aad, 4aad iyo 6aad,
3. Qodobka 8aad, Shuruudaha xubnimada Guddiga faq. B).
4. Qodobka 12aad faq. C)
5. Qodobka 14aad, faq. 15aad iyo 17aad.
6. Qodobka 25aad.

Sidaas darteed, mudanayaasha sharafta leh waxaan idinka codsanaynaa inaad siisiin mulimah gaar ah Hindiyo Shariiceedka oo lagu dhiso Guddiga madaxbannaan ee Doorashooyinka Qaranka, oo si gaar ah ummada Soomaaliyeed iyo beesha Caalamka isha ugu hayso in dalka laga hirgeliyo Doorashooyin sanadka 2016.

**Mahadsanidiin, wada shaqeyn wacan**

**Xildh. Fawsiya Maxamed Sheekh**

**Guddoomiyaha Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulladda Gobollada iyo  
Anniga Qaranka ee Baarlamaanka Federaalka,**

## Talo soojeedinta Xildhibaanada Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya

<p><b>Soojeedinta Guddiga</b></p> <p>Qod. 6aad Guddiga Doorashooyinka wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood si sugaal (9) xubnood si waafaqsan Qod. 111 G ee Dastuurka iyo in laga siiyo xubno wax ka ool ah Haweenka si waafaqsan Qod. 3 (5) ee Dastuurka J.F.S.</p>	<p><b>Ku darida talo soojeedinta Xildhibaanada Golaha Shacabka</b></p> <p>1. Qod.6 Guddiga doorashooyinka wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood si waafaqsan Qod. 111 G ee Dastuurka sida ku-meel-gaarka loo ansixiyay kaa soo ugu yaraan labo (2) xubnood ay yihiin haween.</p>
<p>Qod. 7aad Wasirka wasaaradda ay khuseyso arrimaha doorashooyinka ayaa buqshada Soomaaliyeed dhexdeeda ka soo magacaabaya Guddi laaliyaal oo ku-meel gaar ah oo ka kooban todobo (7) xubnood oo leh sumcad iyo aspoon sare. Guddiga ku-meel gaarka ah wuxuu kala talinayaa Wasirka habraaca iyo xulista musharaxiinta jagada Guddiga Madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka.</p> <p>Qod. 7aad faqradiisa 4aad, Kow iyo labaatan (21) maalmood gudeheed ka bilaabato marka uu Wasirka ay khuseeyso uu soo dhameystiro kala hufdida codsadayaaasha, wuxuu Golaha Wasirada u gudbinayaa todobo iyo labaatan (27) musharrax oo laga soo xulay codsadayaaasha; Golaha Wasirada waxay go'aaminayaan sagaalka musharrax ama soo gudbinayaan Golaha shacabka si uu ansixyo.</p> <p>Qod. 7aad faqradiisa 5aad, Marka uu dhamaado dhegeysiga musharaxiinta ee ku xusan Faqradiisa (5) ee Qodobkan, Golaha Shacabka wuxuu xubin kasta oo la soo magacaabay ku ogolaanayaa ama ku diidayaa cod aqlabiyad fudud oo hal-dheer ah;</p>	<p>Qod. 7aad faqradiisa 4aad, Kow iyo labaatan (21) maalmood gudeheed ka bilaabato marka uu Wasirka ay khuseeyso uu soo dhameystiro kala hufdida codsadayaaasha, wuxuu Golaha Wasirada u gudbinayaa todobo iyo labaatan (27) musharrax oo laga soo xulay codsadayaaasha; Golaha Wasirada waxay go'aaminayaan sagaalka musharrax ama soo gudbinayaan Golaha shacabka si uu ansixyo.</p> <p>Qod. 7aad faqradiisa 5aad, Marka uu dhamaado dhegeysiga musharaxiinta ee ku xusan Faqradiisa (5) ee Qodobkan, Golaha Shacabka wuxuu xubin kasta oo la soo magacaabay ku ogolaanayaa ama ku diidayaa cod aqlabiyad fudud oo hal-dheer ah;</p>
<p><b>Qod. Saad:</b> Faq. B ee qod. 35- aysan ka yarayn 35 senio Qod. 12aad</p>	<p>Qod. Saad faq. B, Da'dii: aysan ka yarayn 30 jir; Qod. 12aad faq. C, Hawl kasta oo kale oo uu u xil saaro Dastuurka ama Shuruucda</p>

## Talo soojeedinta Xiidhibanada Golaha Shacabka Federaalka Soomaaliya

Faq. C hawl kasta oo kale oo uu u xilsaaro Dastuurka ama Sharcigan	kale ee dalka.
<p><b>Qod. 14aa:</b> qodobkiisa. 2aad            Faq. 15aad, khilaafaadka uu xaliyo Guddigu waa kaama dambeys aan ka ahayn daawadaha la xiriira xaqda cod bixinta, xaqda ka qaybgalka doortashada iyo go'aanka kama dambeysa ah ee doortashada kaaso loo qaadan karo ra'caan madaxkamadda Dastuurka sida ku xusan sharciga doortashada</p> <p><b>Qod. 14aad, faq. 17aad:</b> inuu go'aan ka gaaro cabashooyinka la xiriira go'aannada Guddiga, hawlwadeennada ama wakillada Guddigu idmaday kana qaado tallabada ku haboon Haddii go'aanka Guddiga lagu gane' waayo waxaa u furtan in ra'caan loo qaato madaxkamadda Dastuurka muddo 14 maalmood gudahood ah.</p> <p>maaxkamaddu waa in ay go'aan kama dambeys ah ku gaarto sida ugu dhaqsaha badan</p>	<p><b>Qod. 14aad, qodobkiisa 2aad, faq. 15aad:</b> Khilaafadka uu xaliyo Guddigu waa kama dambeys aan ka ahayn daawadaha la xiriira xaqda cod bixinta, xaqda ka qaybgalka doortashada iyo go'aanka kama dambeysa ah ee doortashada kaaso loo qaadan karo ra'caan Madaxkamadda Dastuurka.</p> <p><b>Qod. 14aad faq. 17aad:</b> inuu go'aan maamuleedka Guddiga ka gaaro cabashooyinka la xiriira go'aannada Guddiga, hawlwadeennada ama wakillada Guddigu idmaday kana qaado tallabada ku haboon. Haddii go'aanka guddiga lagu gane' waayo waxaa u furtan in ra'caan loo qaato Maaxkamadda ay khuseyso muddo 14 maalmood gudahood ah, in maaxkamaddu waa in ay go'aan kama dambeys ah ku gaarto sida ugu dhaqsaha badan</p>
<p><b>Qod. 25aad:</b> Guddigu wuxuu waydii karaa tala sharciyeedka Guryaqaanka Guud ee</p>	<p><b>Qod. 25aad:</b> Guddigu wuxuu waydii karaa tala sharciyeed Guryaqaanka Guud ee Dawladda iyo Maaxkamadaha kale ee dalka.</p>



Ref: 33/25/1/9/14

Mogadishu, 20<sup>th</sup> December, 2014

Ku: Xildhibaanada Golaha Shacabka  
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Soo Gudbin Hindiseyaal Sharci


Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinaynaa Hindiseyaasha Sharci oo naga soo gaaray Xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, warqadda sumadeedu tahay XRW/GB/00.232/11/14, kuna Taariikheysan 18/11/2014, ujeedkeeduna ahaa soo gudbin Hindise sharciyeedka Guddiga Madax-bannaan ee Xudurudaha iyo Federaalka, sidoo kale warqadda sumadeedu tahay XRW/GB/00.341/11/14, kuna Taariikheysan 18/11/2014 ujeedkeeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedka Guddiga Qaranka Madax-bannaan ee Doorashooyinka.

Xildhibaanada waxaa laga codsanayaa inay soo akhristaan, waxaana dhawaan Hindiseyaashan la soo gelin doonaa ajendaha Golaha si ay u galaan akhrinta koowaad.

Naga guddooma salaam diiran iyo qaddarin.

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Ja  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka









Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha JFS

=Muqdisho=

Ujeddó: Soo Gudbin 'Hindise-sharciyeedka Guddiga Qaranka Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka'


Mudane Guddoomiye,

Tixraac go'aanka Golaha Wasiirada ee summaddisu tahay SHGW.00.56.11.14 ee 18/11/2014, kuna saabsanaa ansixinta 'Hindise-sharciyeedka Guddiga Qaranka Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka' oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Haddaba, Mudane Guddoomiye, waxaan halkan idinkugu soo gudbinaynaa 'Hindise-sharciyeedka Guddiga Qaranka Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka' si aad uga gudataan xilkiiina Dastuuriga ah.

Waxaan idinka codsanaynaa in aad fidudaysaan ansixinta Hindise-sharciyeedkan maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintisa.

Naga guddooma salaan diiran.



Dr. Cabdiweli Sh. Axmed Maxamed

Ra'isul Wasaaraha Xukuumadda JFS